
UCODEE
MUSHARAX MADAXWEYNE
OMAR ABDULKADIR AHMEDFIQI
2021
Amni
&
IS-AAMIN
MADAXWEYNE
DR. OMAR FIQI
2021
MUSHARAX MADAXWEYNE
Omar Abdulkadir Ahmedfiqi
DR.OMAR
2021
"SIR IYO BEEN SIYAASAD MA'AHAN"



# MUSHARAX MADAXWEYNE

## Omar Abdulkadir ahmedfiqi

1 KU DOORO DIIN SUUBAN

2 KU DOORO DADNIMO

3 KU DOORO DAAHFURNAAN

4 KU DOORO DAACADNIMO

5 KU DOORO DABACSANAAN

6 KU DOORO DAMQASHO

7 KU DOORO DULQAAD

8 KU DOORO DAMIIR SAN

9 KU DOORO SARAYNTA DASTUURKA

“ Sir Iyo been Siyaasad Ma’ahan”

## TAARIIKHDA MUSHARAXA

**Dr. Omar** wuxuu dhashay **1959 tii**, wuxuuna waxbarashadiisii hoose, dhexe iyo sare ku qaatay Magaalada Muqdisho. **Dr. Omar** wuxuu ka qalin jabiyay kulliyada **waxbarashada Lafoole 1981dii**. Kolkaas kadib wuxuu Waxbarasho heer Jaamacadeed ah ku qaatay Wadamada Canada iyo America, wuxuuna ku soo **Takhasusay Culuunta Caafimaadka**. **Dr. Omar** wuxuu Dalka ku soo laabtay horaantii sagaashameeyadii, wuxuuna qayb-libaax ka qaatay wax ka qabashada arrimaha Bulshada, sida Caafimaadka, Waxbarashada iwm. Sidoo kale wuxuu Dr. Omar Dalka ka asaasay Ganacsiyo kala duwan oo Dad faro badan ay ka faa'iidaysteen.

## MY MANIFESTO
(BAYAAN-SIYAASADEED)

Waxaan u soo bandhigaynaa Dadkeenna bayaankan xambaarsan **Aragti-Siyaasadeed** Cusub oo aan doonayno inaan Wadajir ugu dhisno Soomaaliya cusub, oo Casri ah. Aragtidan cusub waxaa asaas u ah
Caddaalad,Wax-wadalahaansho, Xorriyad-Shaqsi iyo Sharaf iyo Qiimo Bulsho **(Social Dignity)**. Waxay u abuuraysaa Shacabka Soomaaliyeed yididiilo iyo Rajo aan lagu daalayn, waxayna keenaysaa Isdhaxgal iyo Xiriir Bini'aadannimo oo ku salaysan Diinta Islaamka iyo Dhaqankeenna Suuban. Waa Aragti **Gorgor (Dheer)** oo xambaarsan Isbeddel dhab ah oo ka jawaabaya xaaladda Dalka iyo Dadku ay ku sugan yihiin xilligan.
Aragtidani waxay ku dhisan tahay Talo-wadaag ku abtirsada Diinteenna.

## 1 LA DAGAALLANKA FASAADKA

Waxaan Dabar-gooynaynaa Dulmiga, Beenta iyo Siyaasad-Dhaqameedka foosha xun ee ka dhinac abuurmay maamulka dowladnimada Soomaaliyeed. Dhaqan-Siyaasadeedka xun ee sababay in masu'uuliyiinta Dowladdu ka sarrayaan Sharciga. Aragtidan waxaa lagu hirgelinayaa Siyaasad dhowrta Dastuurka iyo sarraynta Sharciga, kuna abtirsata **Run-sheeg**, hadafkeeduna yahay in la helo Dowlad ku dhisan Caddaalad iyo Shacab ka faana **Beenta iyo Fasaadka.**

Dowlad u adeegta Shacabkeeda oo gaarta aqal walba ee Muwaaddin Soomaaliyeed ku noolyahay. Si hadafkaas loo gaaro waxaan hirgelinaynaa Xeer lagu ciqaabayo Mas'uulkii Been sheega, Shaqadana looga joojinayo. Xeerkan waxaa lagu suulinayaa Siyaasadda ku dhisan Beenta, ee dumisay Qarannimadeennii. Waxaan ka shaqaynaynaa in Dadkeennu fahmaan in erayga **(Minister)** uu ka yimid Afka Laatiinka, macnihiisuna yahay **(U adeege)** si Wasiirku u noqdo ruux u adeega Dadka ee aan ka adeegan. Waxaan ku wacyigelinaynaa Dadkeenna inay qaab cusub u fekeraan, dhabna u fahmaan inay Dalka iyo Dowladdaba iyagu leeyihiin, lagana rabo inay difaacdaan. Waxaan xilka u doonaynaa inaan beddelno Dowladda Madax ka nool ah, una beddelno Dowlad la wada leeyahay oo ku dhisan Tolo-wadaag. **(KALA DOORO BEEN IYO BARWAAQO).-**

## 2 WAX KA QABASHADA AMNIGA DALKA

Annagoo ka duulayna aragtidan cusub oo asalkeedu yahay Siyaasad Run ku dhisan, waxaan si dhab ah wax uga qabanaynaa Amniga Dalka. Amnigu wuxuu la mid yahay Maskaxda, haddii aysan fayoobayna lama heli karo nolol xasilan. Sidaa darteed waxaan muddo Seddax sano gudahood ah ku xasilinaynaa Amniga Dalkoo dhan. Waxaan ballan qa-adaynaa inaan muddo Afar Bilood gudahood ah ku xasilino Amniga Magaalada Mogadishu, oo aan muddo Soddon sano ah amaankeeda la sugin. Waxaan mudnaan siin

doonnaa inaan sugno amaankeeda iyo inaan dib udhis ku samayno Magaalada Xamar. Si hadafkaas loo gaaro waxaan Toban iyo Toddoba-da Degmo ee Xamar saaraynaa Iskaan **(Scan)** ujeedadiisu tahay inaan ka sifaynayno Hubka. Waxaan Ciidamo u tababaran ka hortaga ar-gagixisada dhigaynaa Waddooyinka laga soo galo Xamar, si looga hort-ago in Hub iyo Waxyaabo qarxa la soo geliyo Magaalada. Kolkaas kadib waxaan mamnuucaynaa in Hub lagu dhax wato Magaalada.
Dabadeedna waxaan billaabaynaa inaan Iskaan saarno Magaalooyinka Dalka oo idil, si aan u sugno Amniga Shacabka. Sidoo kale waxaan Awoodooda iyo Akhlaaqdoodaba tayaynaynaa Ciidamada Qaranka, si ay u difaacaan Dalka, Dadkoodana u daryeelaan.
Si hadafkaas loo gaaro waxaan ka haqab tiraynaa Ciidamadeenna Agab tayo leh iyo Anfac nuxur leh. Si aan akhlaaqda Ciidamada u hagaajinno waxaan shaqaalaysiinaynaa Culumo, Caqiido iyo Dhaqan Suuban leh oo tarbiyo wanaagsan siiya Ciidamada Qaranka, si ay u no-qdaan Ciidamo Qiyam leh, oo ka xishooda Xumaha. **(HADDII DH-AQANKEENNU TOOSO, DHULKAA DHIBLI'I NOO DHALAA).**

## 3 DHOWRISTA XAQUUQUL INSAANKA

Waxaan dhowraynaa Xaqa iyo Karaamada uu Eebbe siiyay Bini'aadamka. Qof kasta wuxuu Xaq u leeyahay inuu helo Nolol ka Madax-bannaan Dulmi. Waxaan ka hortegaynaa in lagu Xadgudbo **Diinta, Nafta, Sharafta, iyo Maalka Shaqsigu uu leeyahay**. Muwaaddinku wuxuu Xaq uu leeyhay inuu helo Amni sugan iyo Xorriyad hufan. Si hadafkaas loo gaaro waxaan horumarinaynaa xeerarka Xaquuqul-Insaanka iyo Xorriyatul-Qawlka waafaqsan Diinteenna iyo Dhaqanka Suuban.

**(HADII AAN DULMIGA LA DIIDIN, DAD IYO DALBA WAA DUMAA)**

## 4 HIRGELINTA GARSOOR MADAX-BANNAAN OO CADDAALAD AH

Waxaan soo dhisaynaa Garsoor Madax-bannaan oo ka hufan Dulmi. Si loo helo Garsoor Caddaalad ku shaqeeya, waxaan Dadkeenna ku baraarujinaynaa ku dhaqanka Diintooda iyo Dhaqankooda Suuban ee laga marin habaabiyay. Waxaan hirgelinaynaa **Garsoor ku dhisan Dhaqanka Soomaaliyeed ee loo yaqaano Xeerbeegti.** Waxaan meel marinaynaa Xeer dhigaya in Maxkamaduhu yeeshaan Guddi Xeerbeegti ah, oo ka qayb qaata go'aamada ay Maxkamaduha gaarayaan. Sidoo kale waxaan ansixinaynaa Xeer dhigaya in qof kasta ee loo furo Gal-dacwo, gacanta loo geliyo wixii laga qoray, si nidaamka Dowligu u noqdo mid daahfuran oo Shaki iyo Tuhun ka hufan.



## 5 XOOJINTA MIDNIMADA

Waxaan ka shaqaynaynaa midnimada Dalka iyo wadajirka Ummadda Soomaaliyeed. Si hadafkaas u hirgelo waxaan ka hortegaynaa ta-faraaruqa Ummadda iyo kale qaybinta Dalka, waxaana si qalbi furan uga shaqaynaynaa isu keenidda Bulsho weynta Soomaaliyeed. Wadajirka Ummadda Soomaaliyeed ma'ahan mid ku salaysan Siyaasad iyo Dhaqa-alo, balse waa mid ku **salaysan Diin, Dhaqan iyo Wada-dhalasho**. Wadajirka iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed waa **waajib Diini ah**, oo aan gorgortan iyo Dood laga gelin karin.

## 6 WADDANIYAD

Waxaan naga go'an in Muwaaddinka Xil-dowlo loo dhiibayo uu yahay Waddani danta-guud ka hormarinaya mida shaqsiga. Waddani u taagan inuu difaaco **Diinta, Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed,** una di-yaarsan inuu **ilaaliyo sarraynta sharciga**. Sidoo kale waa inuu ahaadaa Waddani ka hufan khiyaano-Qaran, musuq-maasuq, Been iyo wax Is dabamarin.

Looma ogolaanayo Dambiile u gaystay dhaawac Diinta, Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed inuu **Xil-dowlo ka qabto Dalka**.



## 7 BIYO NADIIF AH IYO FAYADHOWR

Aragtidan fayow waxaa lagu xaqiijinayaa, in Dadka Soomaaliyeed helaan Biyo Nadiif ah iyo Fayadhowr waara. Waxaan muddo lix Bilood gudahood ah ku hirgelinaynaa inay Dadka deggan Xamar helaan **Biyo nadiif ah**, Faydhowr iyo Nadaafad hufan. Si aan hadafkaas u gaarno waxaan ansixinaynaa Xeer ku waajibinaya Shirkadaha Ceelasha biyaha leh inaysan ka iibin karin Shacabka Biyo aan nadiif ahayn iyo in Degmo walba u istaagto **nadiifinta Degmada,** Dadkuna ay ka qayb qaataan howlaha nadaafadda Degmadooda. Sidoo kale waxaan dhisaynaa **Hay'ad Fayadhowr,** oo karti iyo aqoon u leh ka hortaga wax kasta oo qatar gelin kara caafimaadka Bulshada. Arintan waxaa laga hirgelin doonaa dhammaan Magaalooyinka Dalka.

## 8 DHOWRISTA DEEGAANKA

Waxaan hirgelinaynaa Sharciyo lagu ilaalinayo Deegaanka, si dhulkeenna aan uga dhowrno **Fasaad iyo Nabaad-guur.** Waxaan billaabaynaa wacyigelin heer Qaran ah, oo lagu bogaadinayo, in Ubad kasta ee ku dhasha Dalka Soomaaliya uu beero Geed wanaagsan oo waxtar u leh degaanka uu ku dhashay. Waxaan mamnuucaynaa in la jaro Dhirta iyo in la ugaarsado Ugaarta. Waxaan ku taamaynaa inaan aragno Maroodigii iyo Ugaartii Dalkeenna ka cararay oo dib ugu soo laabtay Dalka. Waxaan sidoo kale hirgelinaynaa Xeer lagu dhowrayo xaquuqda Xoolaha.

## 9 WAXBARASHO TAYO LEH

Aragtidan cusub waxaa lagu hirgelinaynaa Waxbarasho tayo leh, oo lacag la'aan ah, si Dalkeennu u gaaro barwaaqo Sooran. Waxaan hubnaa in tayaynta Waxbarashadu keenayso **(Social Mobilization)** iyo in Muwaaddiniinta Soomaaliyeed helaan fursad ka wanaagsan tii Waalidkood heleen. Waxbarashada tayaysani waxay abuuraysaa Shacab nabadda iyo horumarka Dalka jecel. Shacab fahamsan qiimaha Bini'aadamka iyo macnaha nolosha. Waxaan ka shaqaynaynaa, in Waxbarashada la tayeeyo, laguna saleeyo dhaqankeenna suuban. Si hadafkaas loo gaaro waxaan midaynaynaa Waxbarashada **Diiniga iyo tan Maadiga ah**, waxaana Dugsiyada **Qur'aanka hoos keenaynaa Wasaaradda Waxbarashada**, si loo helo Waxbarasho asaaskeedu yahay Qur'aanka iyo Axaadiista. Waxaan muddo Afar sano gudahood ah ku dhisaynaa Boqol Iskuul oo Agabkoodu u dhanyahay, oo Waxbarasho tayo leh siin doona ubadkeenna, si ay uu helaan **fursad ay Adduunkooda iyo Aakhiradoodaba ku hagaajiyaan.**



## 10 CAAFIMAAD TAYO LEH (WELL-BEING)

Annagoo doonayna inaan ciribtirno Dhaqan siyaasadeedka Beenta ku dhisan, ee ragaadiyay Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed, waxaan hirgelinaynaa Adeeg **Caafimaad oo lacag la'aan ah**, si loo helo Buslsho ku nool **Faraxad iyo Rayn-Rayn.** Hadafkaas si loo gaaro waxaan hirgelinaynaa Isbitaalo **Dowladeed oo tayo leh iyo Shaqaale aqoon Caafimaad iyo Akhlaaq wanaagsan leh,** oo ku hanuunsan inay si Ixtiraam leh u daaweeyaan muwaaddiniinta Xanuunsan. Waxaan **mudnaanta 1-aad siin doonnaa,** in daryeel Caafimaad oo mug leh la siiyo Hooyada iyo Dhallaanka iyo in laga hortago cudurrada faafa. Waxaan sidoo kale ansixinaynaa Xeer lagu ilaaliyo tayada Dawada iyo qiimaheeda, si loo helo Dawo fiican oo Dadku awoodi karaaan inay iibsadaan.

## 11 KOBCINTA DHAQAALAHA

Waxaan dhiiragelinaynaa Wax soo saarka Dalka, waxaana hirgelinaynaa **Infrastrcuture u sahlaya Ganacsatada** inay badeecadooda iibgeeyaan. Waxaan dhisaynaa Waddooyin tayo leh oo fududaynaya isu socodka Ganacsiga Dalka. Waxaan hiigsanaynaa in Wax soo saarka Dalku uu ka bato waxa aan ka soo dhoofsanno **Dalalka shiheeye**. Si hadafkaas loo gaaaro waxaan meel marinaynaa Xeer lagu dhowrayo xaquuqda lahaansho ee **Maskax-Maalka Soomaaliyeed**.

Xeerkani wuxuu sababi doonaa in lagu tartamo hal-abuur iyo Wax-soo saar. Waxaan ka shaqaynaynaa inaan si hufan uga faa'iidaysanno kheyraadka Eebbe nagu mannaystay, innagoo Fasaad ka ilaalinayna Deegaankeenna. Waxaan abuuraynaa fursado ay Dhalinyaradu xoogooda iyo Xeeshooda wax uga soo saaran karaan Dhulkooda hooyo. Waxaan sidoo kale ka shaqaynaynaa in **Dalku Warshado badan yeesho** si loo kobciyo dhaqaalaha Dalka, Dadkuna shaqo uu helaan. Si hadafkaas loo gaaro waxaan hirgelinaynaa Xeerar ku dhiirageliya **Shirkadaha waa wayn inay maalgashadaan Dalka.**

## 12 **HORUMARINTA** ARIMAHA BULSHADA

Waxaan doonaynaa inaan **abuurno bulsho** aqoon buuxda u leh ujeedada loo abuuray, diyaarna u ah inay difaacdo hadafkaas. Bulsho abaabulan oo u diyaarsan inay hogaanka u qabato **Qaaradda Afrika iyo Adduunka** intiisa kale. Bulsho Dulmi diid ah, oo nolosheeda ku salaysa Sinnaan iyo **Caddaalaad, uu Eebbe ka raali yahay.** Si hadafkaas aan u gaarno waxaan adeegsanaynaa wacyigelin iyo baraarujin baahsan oo joogto ah, oo lagu gudbinayo **Nabad iyo Hannaan** asluubeed cilmiyaysan, oo abuuraya Bulsho isjecel oo leh dareen guud oo ku salaysan Qarannimo ka weyn Qabayarada
Qabyaaladda. Waxaan aaminsannahay in Dadkeennu leeyahay **Tayo iyo Karti** ay ku kasban karaan horumar deg deg ah, haddii lagu hogaamiyo siyaasad ka hufan Been iyo Eex, kuna dhisan Qiyam iyo feker toosan. Waxaan muddo xileedka Dowladda aan soo dhisi doonno ku ansixinaynaa Xeerarka ay ka mid yihiin:



## HORUMARINTA QOYSKA 1

Waxaan hirgelinaynaa Xeer dowladda ku waajibinayaa inay Degmo walba ka dhisto Xarumo caruurta lagu xanaaneeyo oo ay ka shaqeeyaan **Shaqaale Xirfad** u leh sida loo xanaaneeyo Ubadka. Xeerkani wuxuu waaliddiinta siinayaa fursad qaali ah oo ay ku galaan Suuqa shaqada, si ay Dhaqaalo ku filan u kasbadaan. Xeerku wuxuu sidoo kale keenayaa:

- In Ubadka Soomaaliyeed si buuxda u helaan xuquuqdooda Bini'aadannimo, laguna barbaariyo **Kalgacal, Sinnaan, Caddaalad,** Waddaniyad iyo Qab-Qarannimo.
- In Ubadka Soomaaliyeed lagu abaabiyo Wada shaqayn, Wax wada lahaansho, **Talo-wadaag, Wadajir** iyo Walaalnimo ay ku hantaan hogaaanka Adduunka.
- In waalidiinta Soomaaliyeed loo abuuro **fursad Waxbarsho**, si ay ula jaan qaadaan teknolojiyada cusub ee had iyo jeer Suuqa shaqada ku soo kordhaya.

## DHIIRAGELINTA MUWAADDINKA AAN ISKU FILNAYN 2

Waxaan ansixinaynaa qodob Dastuuri ah oo dhigaya in muwaaddinka aan Masruufi karin naftiisa, cid masruuftana aan heli karin ay **Dowladdu Masruufto**. Qodobkani wuxuu ka xoreeynayaa Hooyooyinka Soomaaliyeed dhibaatooyinka dhaqan-dhaqaale,wuxuuna sababayaa in la helo Qoysas ku dhisan isjecayl. Sidoo kale wuxuu xeerkani kaalayaa Dadka baahida gaarka ah leh, ee aan shaqaysan karin iyo Waayeelka aan lahayn Ubad xanaaneeya.

## DARYEELKA IYO KORINTA AGOONTA 3

Waxaan meel marinaynaa Xeer dhigaya in Dowladdu koriso **Agoonta, Derbijiifka iyo Dadka dhimirka la'.** Xeerkani wuxuu ka dhex dhalinayaa Bulsho weynta Soomaaliyeed iyo Dowladdooda kalsooni buuxda. Wuxuuna muwaaddiniinta Soomaaliyeed ku dhiiragelin doonaa inay bixiyaan **canshuuraha Dalka,** iyagoo ku faraxsan oo og, inay waajib Diini ah gudanayaan.

## MAMNUUCIDDA DHIBAATEYNTA UBADKA

4

Waxaan hirgelinaynaa Xeer lagu mamnuucayo in Ubadka Soomaaliy-eed loo gaysto **Dil (Garaac),Takoor, Cabsigelin, Hanjabaad, Ihaano iyo wax kasta oo dhaawici kara ruuxda iyo jirka Ubadka.**

## XEERKA GUURKA

5

Waxaan ansixinaynaa **Sharci guur oo aad u waafaqsan Diinta Is-laamka**. Si hadafkaas loo gaaro waxaan hirgelinaynaa Xeer waajib-inaya in Meherka labada ruux ee isguursanaya uu fuliyo Qaalli Sharci u haysta. Waxaa la mamnuucayaa Meher aan waafaqsanayn Xeerka kor ku xusan.

## XEERKA FURIINKA

6

Waxaan meel marinaynaa **Xeer ku waajibinaya ragga furay Dumar** u haya Ubad inay masruufaan Ubadka iyo Hooyadood. Xeerkani wuxuu sidoo kale Dowladda ku waajibinayaa inay Masruuf ku filan siiso Ubadka la nool Hooyo la furay, haddii uu Ubadka Aabbahood diido ama **meer-meeriyo Masuurfka caruurtiisa.** Dowladdu waxay Xaq u leedahay inay u doonato Aabbaha dhalay Ubadka Masruufkii ay siisay Ubadkiisa. Haddii Aabbuhu uusan awoodin, waa ku dayn,laga rabo markii uu awood dhaqaalo helo.

## DIIWAANGELINTA DHALASHADA

7

Waxaan ansixinaynaa Xeer waajibinaya in la diiwaangeliyo Ubadka ku dhashay Dalka. Xeerkan wuxuu Degmo walba ku waajibinayaa inay dii-waangeliso, oo ay **Gal u sameyso (Database)** Cunug walba ee ku dhasha Degmada. Hadafka laga leeyahay xeerkan waa in bulshada Soomaaliyeed la jaan qaado **horumarka Adduunka**, oo ay ka guurto dhaqanka aan ku salaysnayn dhigaalka.

## DIIWAANGELINTA GEERIDA 8

Waxaan hirgelinaynaa Xeer ku waajibinaya Degmooyinka Dalka inay diiwaangeliyaan ruuxii ku **geeriyooda Degmaadooda** inta aan la aasin ka hor

## DABARGOOYNTA TAKOORKA 9

Waxaan ka shaqaynaynaa in si deg deg ah loo ansixiyo Xeer lagu mam-nuucayo takoorka nuucyadiisa kale duwan sida: **Midab-takoorka, Af-Takoor, Jinsi-Takoor, Nasab-Takoor, Cillad-Takoor.**

## DARYEELKA DADKA BAAHIDA GAARKA AH LEH 10

Waxaan hirgelinaynaa Xeer shaqo loogu abuurayo Dadka baahida gaarka ah leh, si ay u noqdaan Dad maaraysan kara noloshooda si la mid ah Dadka aan baahida gaarka ah qabin. Waxaan sidoo kale ansix-inaynaa Xeer ku waajibinaya dhammaan **Hay'adaha Dowliga** ah iyo Xarumaha ganacsiga inay yeeshaan Adeeg loogu talogalay Dadka baa-hida gaarka ah leh. Xeerkani wuxuu mamnuucayaa in la furo ama la dhiso Xarun-dowlo ama **Goob-Ganacsi** oo aan dabooli karin baahida **gaarka ah dadka qabo**. Hay'adaha dowliga ah wuxuu ku waajib-inayaa inay mudnaan gaar ah siiyaan shaqo-doonka baahida gaarka ah leh.

## HORUMARINTA HIDDAHA, FANKA IYO DHAQANKA 11

Waxaan hirgelinaynaa Xeer lagu horumarinayo **Hiddaha, Fanka iyo Dhaqanka Soomaaliyeed.** Xeerkan wuxuu ku waajibinayaa Deg-mooyinka iyo Gobollada Dalka inay Sanad walba Miisaaniyad Dhaqa-ale meel u dhigaan horumarinta **Hiddaha, Fanka, Dhaqanka iyo Suugaanta Soomaaliyeed**. Dhaqaalaha loogu talogalay horumarinta **Hiddaha, Fanka iyo Dhaqanka**, waxaa soo dalban kara ururada max-alliga ah, ee ka shaqeeya horumarinta **Dhaqanka, Fanka iyo Hidda-ha**, kuna shaqeeya Iskaa wax uqabso.


MUSHARAX MADAXWEYNE
OMAR ABDULKADIR AHMEDFIQI
2021
“SIR IYO BEEN SIYAASAD MA'AHAN ”